



SOMALI
504 Plan

504 QORSHE

Maxaad samayn lahayd hadii ilmahaagu kaalmo dheeraad ah u u baahdo si uu uga najaxo waxbarashada balse aanu ka qayb gali karin Waxbarashada Gaarka ah? Warayso Qorshaha 504! Qorshani waxa uu jeexay nidaam iyo adeegyo daruuri u ah ilmaha, si uu waxbarashada si buuxda uga faa'idaysto.

Iswaydii, Waydii Dhakhtarkaaga ama Macalinkaaga:

- Ilmahaagu ma qabaa laxaad la'aan ka caqabadaynaysa inuu si buuxa uga qayb galo daruuriyaadka waxbarashadiisa?
- Tani ma waxay ku tahay caqabad hor taala si uu wax u barto?

Talaabada 1 – Referto

- Hadii aad istidhaahdo in uu ilmahaagu ubaahan yahay deegaan gaar ah maadaama oo uu laxaad la'yahay, warqad u qor maamulaha dugsiga aad kaga dalbanayso in ilmahaaga loo xit galiyo qorshaha 504.
- Nuqul kala hadh arjiga oo hayso.

Talaabada 2 – Qiimayn Shakhsi Ahaaneed

- Koox dugsiga ka tirsan ayaa qiimayn ku samayn doonta in uu ilmahaagu laxaad la'aan ka xakamaysa dhaqdhaqaaqyada muhiimka ah ee nolosha (araga, maqalka, socodka, waxdhigashada, iwm.).
- Marka qiimayntu soo gabo gabawdo dagmada ayaa soo qaban qaabin doonta kulan kooxdu iskugu yimaadaan si loo ogaado in uu ilmuhu u qalmo qorshaha 504 (Waalidks/qoysku waa kamid kooxdaas).
- Dugsigu waa in uu waalidiinta la socodsiiyaa goobta iyo wakhtiga uu isku imaatikani dhacayo si ay uga soo qayb galaan.

Talaabada 3 – Qorista qorshaha 504

- Marka uu ilmuhu u qalmo, waa inay kooxdu diyaariyaan qorshe.
- Qorshaha 504 waa inay ka mid yihiim adeegyada iyo nidaamyada ardayga u sahlaha in uu si siman uga qayb galo barnaamijyada dugsiga.

Talaabada 4 – Dib U Eegista qorshaha 504

- Dagmada dugsiga ayaa sanad walba dib u eegis ku samayn doonta qorshaha si loo suga inay nidaamyada iyo adeegyada la siiyay ardayga iyo in dib u eegis lagu sameeyo kasoo raynta ardayga si looga go'aan qaato in uu wali daruuri u sii tahay.



Qaybta 504 waa sharci heer federal ah oo loogu talo galay in uu ilaaliyo xuquuqda dadka laxaadka la' oo uu ku ilaaliyo barnaamij iyo dhaqdhaqaaq kaalmo dhaqaale oo heer federal ah ka hela dawlada U.S. Waaxda Waxbarashada (ED).



Ma jiro qorshe isku mid ah oo 504 ah, arday kastaa baahi gooni ah ayuu leeyahay hadii uu u qalmo barnaamijkana waxa uu helayaa qorshe gooni ah.



Waxbarashada munaasibka ah ee qaybta shuruucda 504 ee ardayga laxaadka la'i waxay ka koobnaan kartaa waxbarasho fasal caadi ah, waxbarasho fasal caadi ah oo ay ku lifaaqan adeegyo dheeri ah, iyo/ama waxbarasho gaar ah iyo adeegyadii munaasabka ku ahaa.



Waxyaalaha kujira dukumiintigaan waxaa lagu sameeyay deeq katimid Waaxda Waxbarashada Marakanka, #H325160003. Hase yeeshee, waxyaabahaas muhiim maaha inay matalaan siyaasada Waaxda Waxbarashada Maraykanka, umana qaadan kartid in dawlada dhexe kugu taageerto. Madadaxa Mashaariicda, Carmen Sanchez.

(716) 332-4170

info@parentnetworkwny.org

www.parentnetworkwny.org



Tixraaca iyo xogta waxaa bixiyay:

-www.opwdd.ny.gov

-www2.ed.gov

Visit parentnetworkwny.org for more info.

@ParentNetwork

@PNWNY